

Jawaab Bixinta Caafimaadka Dadweynaha

Kaalinta Caafimaadka Dadweynaha

Caafimaadka Dadweynaha waxay wadaan qorshaha, leyliga iyo tababarka shaqaalaha ee la xiriira ka jawaab bixinta xaaladaha degdegga ah ee caafimaadka dadweynaha.

Caafimaadka dadweynaha waxaa loo tababaray in ay ka jawaab bixiyaan gargaarka degdegga ah ee kala duwan. Waxaa kuwani ka mid ah cudurrada la xiriira cuntada iyo biyaha, ama marka ay dillaacaan cudurrada faafa ee dad badan saameeya.



Maanta waxay ka jawaab bixiyeyaasha hore, booliiska, dabdamiska, la sameysanayaan qorshe looga jawaab bixiyo xaaladaha degdegga ah ee caafimaadka dadweynaha ee mustaqbalka.

Kaalintaada

Marka ay yimaadiin xaaladaha degdegga ah, u feejignow. Waxaad raacdaa tilmaamaha Waaxda Caafimaadka Dadweynaha, Waaxda Caafimaadka Dadweynaha Minnesota, iyo hay'adaha kale ee dawladda.

Xusuusnow, qof waliba kaalin ayuu ka geystaa u diyaar garowga xaaladaha degdegga.

Shakhsiyaadka iyo qoysaska kaalintooda ayeey ka geysan karaan iyagoo diyaarsanaya liiska dadka ay la xiriiri karaan marka ay jirto xaaladda degdegga iyo qalabka degdegga ah.

Ilaha

www.health.state.mn.us
www.echominnesota.org
www.redcross.org

Way Dhacaan Xaaladaha Degdegga ah



Saint Paul – Ramsey County
Department of Public Health
www.co.ramsey.mn.us/ph
651-266-2400



Community Action Partnership
of Ramsey & Washington Counties
www.caprw.org
651-645-6445



Community Action

U Diyaar Garow.

Xaaladaha degdegga waa kuwo dhaca, badanaa marka aan la filaynin. Dabeylo xooggan ayaa burburiya xaafado idil. Roobab dabeylo wata ayaa soo rida filoyinka korontada. Cudurrada biyaha ka dhasha ayaa xanuunno keena. Adiga iyo qoyskaaga waad u diyaar garoobi kartaan xaaladaha degdegga.

Inta aysan imaan xaalad degdeg ah, waxaad diyaarsataa waxyaabaha soo socda:

Liiska dadka lala xiriira xaaladda degdegga oo ay ku yaalliin magacyada asaxaabta iyo qaraabada.

- Waxaad raacisaa dadka uu furaha taleefoonkooda ka duwan yahay kan deegaanka aad ku nooshahay maadaama laga yaabo in ay ka fudud tahay in lala xiriira marka ay dhacdo xaalad degdeg ah.
- Waxaad xulataa meel aad kula kulanto reerkaaga haddii aadan taleefoon iskula xiriiri karin.

Qalabka degdegga ah oo ay ku jiraan:

- raadiyo batteri ku shaqeeyo, biyo, cunto oo aan hallaabin, gogosha jiifka, xirmada gargaarka degdegga ah, bacda qashinka, iyo daawooyinka dhakhtarku qoro
- taleefoon oo aan u baahnayn tamar uu ku shaqeeyo.

U Tababaro.

Dugsiyada iyo ganacsiyada waxay bartaan sida loo dhaqmo marka uu dab kaco. Qoysaska ayaa iyagana baran kara sida loo dhaqmo marka ay dhacdo xaalad degdeg ah. Haddii ay timaad xaalad degdeg ah, barashada ayaa dhimaysa kadeedka islamarkaana badbaadinaysa nolosha.

Waxyaabaha soo socda ayaa ah qaabab la baran karo ee sida loogu diyaar noqdo xaaladaha degdegga ah:

- Waxaad tijaabisaa in aad wacdo dhammaan dadka ku jira liiska dadka aad la xiriirayso xaaladda degdegga ah.
- Laba goor sanadkii waxaad dibu eegtaa dadka ku jira liiska marxaladda degdeg ah.
- Waxaad cusboonaysiisaa liiskaaga xaaladda degdegga ah marka ay wax isbeddelaan.
- Waxaad barataa nadaafadda – dhaq gacmahaaga, qufacaaga dabool, oo gurigaaga joog marka aad xanuunsan tahay.



Ka qayb qaado.

Bulshadaadu way kuu baahan tahay. Waxaa jira fursado badan oo looga qayb qaadan karo u diyaar garowga xaaladda degdegga ah. Barnaamijyo badan ayaa u tababaraya dadka tabar-ruca ah sidii ay u gargaari lahaayeen haddii ay timaad dhibaato caafimaad.

Fursadaha Hawlaha Tabarruca:

- Twin Cities Chapter of the Red Cross waxay bixiyaan fursado badan ee la xiriira tabar-ruca. Waxaad wacdaa 612-872-3271 ama email u soo dir: volunteer@redcrosstc.org
- Medical Reserve Corps (Kooxda Kaydka Caafimaadka) , waxay meel isugu keenaan khabiirada caafimaadka ee deegaanka si ay uga caawiyaan bulshada ku nool in ay u diyaar garoobaan ka jawaab bixinta xaaladaha degdegga ah ee caafimaadka dadweynaha. Si aad uga qayb qaadato, waxaad email u soo dirtaa mrc-ramsey@co.ramsey.mn.us. Ama waxaad wacdaa 651-266-2480.

Haddii aad doonayso macluumaad dheeraad ah ee ku saabsan u diyaar garowga xaaladaha degdegga ah (oo Soomaali ku yaal) waxaad eegta: www.echominnesota.com

